

Dhameystirka Child Care Basics (Asaasiyaadka Daryeelka Carruurta)

Child Care Basics (Asaasiyaadka Daryeelka Carruurta, CCB) waa 30-saac tababar ah oo buuxinaya qeyb ka mida shuruudaha badqabka iyo caafimaadka ee macalimiinta ka shaqeynaya xarumaha shaatiga haysta WAC 110-300-0106 (3). Waxyaabaha uu ka kooban yahay wuxuu daboolayaa mawduucyada fadaraalku waajibiyey sida uu u baahan yahay Child Care Development Fund (Sanduuqa Horumarinta Daryeelka Carruurta, CCDF) iyo adeeg-bixiye barbaarin bixiye kasta oo ku qancay shuruuda CCB oo ku diwaangaliyey MERIT oo sidoo kale buuxiyey shuruudaha Nidaamyada Badqabka iyo Caafimaadka Shakhsiga. Macluumaad dheeriya, booqo <https://app.leg.wa.gov/wac/default.aspx?cite=110-300-0106>.

Sideen u Dhameystiri Karaa CCB?

Adeeg-bixiyayaasha barbaarintu waxay dooran karaan mid ka mida kuwan soo socda Department of Children, Youth, and Families (Waxda Carruurta, Dhaliyaraada, iyo Qoysaska, DCYF)-ikhtiyaarada loo ansixiyey dhameystirka shuruuda tababarka CCB:



DOORO HAL IKHTIYAAR

COVID-19 Tababar CCB Kumeelgaara (Diyaar Ahayn)

Qeybtan ku meelgaarka, waxa loo tixgaliyaa in CCB aanay diyaar ahayn. Kuwa doortay ikhtiyaarkani, waxay u baahan doonaan inay dhameystiraan qeyb dhameystiran oo CCB inta lagu jiro sanad taariikheedka 2022 (Jeenawari 1 – Diseembar 31, 2022).

Tababarka CCB

Ku dhameystir tababarkan onlaayn ama shakhsiyani, siduu bixiyey tababare uu ansixiyey gobolka DCYF. Ka raadi ikhtiyaarada la heli karo “Hel Tababarka” onlaaynka MERIT ee <https://apps.dcyf.wa.gov/MERIT/Search>.

ECED&107 Health, Safety & Nutrition (Caafimaadka, Badqabka, iyo Nafaqaynta)

Dhameystir kooraskan koolejka madaamoo DCYF-u aqoonsatay badelka CCB. Isticmaalka Qeybta Qorsheynta Xirfada Barbaarinta si aad u heshid tilmaamaha bixinaya kooraska kuu dhow <https://ececereers.del.wa.gov/find-degree/advanced-search>. Haddii aad dhameystirtay kooraskan ka hor jilaalka 2019, waa inaad dib u eegtaa Hagaha Caafimaadka Cunuga & Badqabka Dheeriga ah ee tinyurl.com/HealthSafetyGuide.

ECED&100 Child Care Basics (Asaasiyaadka Daryeelka Carruurta)

Dhameystir kooraskan koolejka madaamoo DCYF-u aqoonsatay badelka CCB. Isticmaalka Qeybta Qorsheynta Xirfada Barbaarinta si aad u heshid tilmaamaha bixinaya kooraska kuu dhow <https://ececereers.del.wa.gov/find-degree/advanced-search>.

Early Childhood Education (Waxbarashda Barbaarinta Carruurta, ECE) + DCYF Nidaamyada Onlaaynka

Haddii aad leedahay 12 dhibcod ECE ama shahaado ay aqoonsan tahay DCYF, waxaad dhameystiri kartaa dhammaan shanta nidaam “Caafimaadka Fadaraalka & Badqabka” ee Qeybta Tababarka Ardeyga DCYF ee onlaaynka <http://dcyftraining.com>. Si aad u dhameystirtid ikhtiyaarkan, waa inaad haysataa labadaba waxbarasho ku haboon iyo dhammaan shanta nidaam “Tababarka Caafimaadka Fadaraalka & Badqabka” ee lagu xaqiijiyey diwaankaaga MERIT. Nidaamyadan laguma tiriyo saacadaha adeegyada. Waxbarashada ku haboon ikhtiyaarkan waxa ka mida:

- 12 ECE ama ECE/Dhibcaha qeybta Da'da Dugsiga ee Koolejka
- 13 Shahaadooyinka Dhameystirka Nidaamyada Militari
- Imika Child Development Associate (Shakhsiga Horumarinta Carruurta, CDA)
- Montessori Credential/Endorsement (Ansixinta/Taageerida Montessori, MACTE)

Head Start, ECEAP

iyo Shuraakada Dugsiga Degmada


DCYF waxay la shuraakoobaysaa Head Start, ECEAP iyo Degmooyinka Dugsiga si loo aqoonsado tababarka la bixiyey ee caafimaadka iyo badqabka sida shirku sheegayo iyo shuruudaha fadaraalka. La hadal kormeeraha goobtaada si aad u ogaatid inay siiyaan tababar la aqoonsan yahay shaqaalaha.



Washington State Department of
CHILDREN, YOUTH & FAMILIES

Sideen u hubiyaa in dhameystirka CCB ka muuqdo diwaankayga MERIT?

Fadlan u tixraac jaantuskan soo socda si aad u ogaatid cida ka masuulka ah ogeysiinta DCYF dhameystirka CCB.



Sideen u Dhameystiri Karaa CCB?	Yaa hubiya in MERIT muujiso inaan dhameystiray CCB?	Maxaan u baahanahay inaan sameeyo?
Tababarka Child Care Basics (Asaasiyaadka Daryeelka Caruurta)	Tababaraha gobolku ansixiyey ama DCYF wakiil wakaalad ay aqoonsan tahay	Ma jirto talaabo loo baahan yahay. Haddii tababarku aanu ku jirin diwaankaaga 30 maalmood gudohood dhameystirka tababarka, oo tababaruhu aanu awoodin inuu caawiyo, la xidhiidh MERIT@dcyf.wa.gov oo sii nuqulka shahaadada CCB gaaga.
ECED&107 Health, Safety & Nutrition (Caafimaadka, Badqabka, iyo Nafaqaynta)	Adeeg-bixiye/arday	Dhameystir codsiga waxbarashada ee MERIT oo soogali ama iimayl kusoo dir nuqulka taransikibtiga rasmiga ah halkan education.verification@centralia.edu
ECED&100 Child Care Basics (Asaasiyaadka Daryeelka Carruurta)		
Early Childhood Education (Waxbarashada Barbaarinta Caruurta) + DCYF Nidaamyada Caafimaadka Shakhsiga & Badqabka onlaaynka ah	Adeeg-bixiye/arday	Gudbi kuwan soo socda: <ol style="list-style-type: none"> 1. Dhameystir codsiga waxbarashada ee MERIT oo soogali ama iimayl kusoo dir nuqulka taransikibtiga rasmiga ah halkan education.verification@centralia.edu. 2. Dhameystir dhammaan shanta “Tababarada Caafimaadka & Badqabka Fadaraalka” ee Qeybta DCYF Tababarka Ardeyga https://dcyftraining.com. 3. Ka ogeysii DCYF dhameystirka halkan MERIT@dcyf.wa.gov.
Head Start, ECEAP iyo Shuraakada Dugsiga Degmada	Tababaraha gobolku ansixiyey ama DCYF wakiil wakaalad ay aqoonsan tay	La xidhiidh maamulaha goobta si aad u weydiisid inay bixiyaan qaabab lagu buuxinayo tababarka loo baahan yahay. Maamulaha goobtu wuxuu masuul ka yahay abuurida, u xaqiijinta qorshaha tababarka DCYF iyo ogeysiinta taariikhda dhameystirka.

CCB—Su'aalaha Badanaa La Is-Weydiiyo

Waxa Ku Jira CCB?

Mawduucyada Caafimaadka iyo Badqabka (Siday u Baahan tahay CCDF)

- Ka hortaga iyo xakameynta xanuunada faafa
- Dhaqamada seexashada badqabta
- Maamulka daawooyinka
- Ka hortaga iyo ka jawaabista xaaladaha degdega ee ay ugu wacan tahay falcelinta cuntada iyo xasaasiyadu
- Badqabka dhisida iyo dhismayaasha caadiga
- Kahortaga xanuunka waxyeela ilmaha ee syndrome-ka
- U diyaargarowga xaalada degdega iyo qorsheynta jawaabta xaalada degdega
- Waxkaqabashada iyo kaydinta agabka halista ah
- Taxadirada haboon ee gadiidka caruurta, haddii ay khusayso
- Gargaarka caruurta iyo daaweynta wadnaha
- Aqoonsiga iyo kawarixinta xadgudubka iyo dayacaada cunuga

Shuruudaha tababarka CPR, Gargaarka Degdega, Xanuun-sababayaasha Dhiiga ku Dhasha iyo Badqabka Hurdada ayaa lagu daray CCB waana in la dhameystiraa si loo buuxiyo WAC 110-300-0106.

Child Care Basics (Asaasiyaadka Daryeelka Caruurta)

Waxa ku Jira 30 Saac oo Casharo, Lagu Bixiyey 10

Nidaam

1. Aqoonta Sare
2. Qiimeynta Cunug Kasta iyo Bulshada
3. Koritaanka Caruurta iyo Horumarka
4. U dabaaldegga Korniiinka Caruurta
5. Manhajka iyo Barashada Deegaanka
6. Shuraakada Qoyska iyo Bulshada
7. Xeerarka Caafimaadka (Qeybta 1)
8. Xeerarka Caafimaadka (Qeybta 2)
9. Isdhexgalka iyo Hagitaanka
10. Ka Taageerida Caruurta Guusha Noloshu

Ma heli karaa ka dhaafka CCB?

DCYF kama dhaafto adeeg-bixiyayaashu inay dhameystiraan tababarka loo baahan yahay ee caafimaadka iyo badqabka. Haseyeeshee, DCYF waxay dejisay nidaam kale oo lagu xusay sare si loo buuxiyo shuruuda CCB.

Haddii aan marhoreba dhameystiray CCB, miyaan u baahanahay inaan dhameystiro nidaamyada Caafimaadka iyo Badqabka Fadaraalka?

Adeeg-bixiyayaasha buuxiyey shuruuda CCB ee qaab kasta oo hore loo bixiyey ka hor Ogos 2019 oo ku diwaangaliyey



diwaankooda MERIT loogam baahna inay dhameystiraan "Nidaamyada Caafimaadka iyo Badqabka Shakhsiga." Warbixinahan mawduucyada caafimaad iyo badqab fadaraal cusub ayaa lagu bixiyey hagaha dheeriga madaamoo macluumaad cusub lasii daayey. Kaladeg *Health and Safety Supplement Guide (Hagaha Caafimaadka iyo Badqabka Dheeriga)* (EPS_0038) onlaayn:

- Ingiriisi: www.dcyf.wa.gov/sites/default/files/pubs/EPS_0038.pdf
- Isbaanish: www.dcyf.wa.gov/sites/default/files/pubs/EPS_0038SP.pdf
- Soomaali: www.dcyf.wa.gov/sites/default/files/pubs/EPS_0038SM.pdf

Haddii shahaadada tababarka aan la galin MERIT, DCYF ma aqbali doonto dhammaan shahaadooyinka dhameystirka tababarka todobo sano ka dib taariikhda tababarka.

Waxaad ka fiirin kartaa dhammaan Shuruudaha Tababarkoo Dhan iyo Jadwalka Dhameystirka macmuulaad dheeriyaya onlaaynka www.dcyf.wa.gov/sites/default/files/pdf/TrainingRequirements_WACGuidebook.pdf.

Sidee ayey DCYF ula shuraakoobaysaa Head Start, ECEAP iyo barnaamijyada kahor dugsiga ee Dugsiga Degmada ee CCB?

Haddii macalin ka qeyb yahay Head Start, goobta ECEAP ama dugsiga degmada barnaamijka ka hor dugsiga, barnaamijku wuxuu sheegi karaa inay buuxiyeen shuruudaha tababarka caafimaadka iyo badqabka ee ku jira WAC 110-300-0106. Macluumaad dheeriyaya, booqo <https://app.leg.wa.gov/wac/default.aspx?cite=110-300-0106>. Barnaamijka shaqaaleysiinayaa wuxuu masuul ka yahay diwaangalinta dhameystirka tababarka la bixiyey isagoo ka wakiila macalinka.

Dhibcaha kolej aha shahaadada kuwee ayaa iga caawin kara inaan buuxiyo CCB?

Dhibcaha kolejka ama shahaadooyinka waxay kaa caawin karaan inaad buuxisid shuruudaha CCB haddii aad sidoo kale dhameystirtid DCYF onlaayn ah nidaamyada caafimaadka iyo badqabka. Ikhtiyaarkani waxa loogu talagalay inuu caawiyo adeeg-bixiyayaasha marhoreba dhameystiray waxbarashooda, iyo koorsooyinkoodu aanay ku jirin mid ka mida ikhtiyaarada lagu sheegay sare.



Tani waxay noqon kartaa ikhtiyaarkaaga haddii aad leedahay **mid** ka mida dhibcahan koolejka ama shahaadooyinka:

- 12 ECE ama ECE/Dhibcaha qeybta Da'da Dugsiga
- 13 Shahaadooyinka Dhameystirka Nidaamyada Militari
- Imika Child Development Associate (Shakhsiga Horumarinta Caruurta, CDA)
- Montessori Credential/Endorsement (Ansixinta/Taageerida Montessori, MACTE)

Oo – waxaad dhameystiri doontaa dhammaan shanta “**Tababarada Caafimaadka & Badqabka Fadaraalka**” ee Qeybta DCYF Tababarka Ardeyga onlaaynka <https://dcyftraining.com>, oo ay ku jiraan kuwan soo socda:

- Warbixiye Waajiba – Aqoonsiga iyo Kawarbiinta Xadgudubka Caruurta
- Udiyaargarowga Xaalada Degdega & Masiibooyinka
- Maamulka Daaweynta
- Qoysaska Waajahaya Guri-la'aan
- Xadgudubka Argagaxa Maskaxda

Miyaa CCB buuxinaysaa saacadaha tababarka sanadka?

Haddii aad dhameystirtay tababarka CCB ama haddii aad dhameystirtay early childhood education (waxbarashada barbaarinta caruurta) **isla** sanadka, waxaad buuxisay shuruudaha tababarkaaga ee sanadka. Lagaagama baahna inaad dhameystirtid saacado adeeg dheeriya.

Haddii aad dhameystirtay tababarka CCB ama waxbarashada loo baahan yahay ikhtiyaarka **kahor** sanadka hada, maad buuxin shuruuda tababarkaaga ee sanadka dhammaan tababarkan. Waxaad u baahan tahay inaad dhameystirtid saacado adeeg dheeriya.

Xasuusin ahaan, saacadaha tababarka waxa dib loo eegaa sanad taariikheedka. Sanad taariikheedku wuxuu ka bilaabmaa Jeenawari 1 wuxuuna socdaa ilaa Diseembar 31.